

## Emergency, Community, Health and Outreach

### **ECHO Digital Short** **“Barnaamijka Baaritaanka Guud ee Caruurta Iyo Barbaarta ayaa Caruurta Caafimaadkooda Suga”**

### **“Child and Teen Checkups Keep Kids Healthy”**

**Digital Short Script, Approved Final | 12 Nov 2013**

**Word Count: 379 Words | Reading Grade Level: 4.9**

*Qaddarkan yar ee daawashada ah waxaa loogu tala galay qoysaska iyo caruurta haysta karaka caafimaadka dawladda ee Medical Assistance ama MinnesotaCare. Qaddarkan daawashada ah ayaa si kooban u dulmaraya daryeelka caafimaad ee ka hortagga u ah ee caruurta iyo kuwa hanaqaadka ah. Sidoo kale qoysaska haysta kaarkan ayuu ku dhiira galinayaa inay barnaamijka Baadhista Caruurta iyo kuwa Hanaqaadka uga faa'iideeyaan. Maadaama aysan dhamaan daawadayaashu kaarkan caafimaad wada haysanin, qaddarka daawashadan gaaban waxay wacyi galin u wada tahay Baadhidda Caruurta iyo kuwa Hanaqaadka ah iyo sida maskax galka ah iyo sida ugu haboon ee lagu sugi karo caafimaadka caruurta iyagoo la xidhiidhaya kiliinkyada ay caadiga u tagaan.*

Scene	Audio	Video (do not translate)
1	Waalid walba ayay shaqadiisu tahay inuu daryeelo caruurteena. Qayb kamid ah daryeelka wacaan waa inaad caruurta iyo kuwa hanaqaadka ah geysaa dhakhtar-iyagoo xitaa aan xanuunsanayn. Tani waxa laga yaabo in ay jaaliyadeena ku cusubtahay.	Happy children at play.
2	Hello, magacaygu waa _____. Qoysaska Somaliyeed waa ay yaqaanaan in marka ay caruurtu xanuunsato ama nabari gaadho u baahanyihiin inay arkaan dhakhtar ama kalkaaliye/kalkaaliso.	Host on camera.
3	Ilmahaagu mar walba waa uu korayaa. Maalin walba inta ay sii weynaanayaanba, jidhkooda, maskaxdooda iyo dareenkoodaba waa uu is baddelayaa. Laga soo bilaabo marka ay dhashaan, inta ay korayaan oo ay ka weynaanayaan, caruurtu waxay u baahantahay daryeel caafimaad oo iyaga ku haboon. Sida ugu fiican ee aad ilmahaaga u caawin karto si uu u noqdo mid caafimaad qaba ayaa ah inuu dhakhtarka ugu tago baaritaanka guud caruurta iyo barbaarta.	Happy children at play.
4	Bulshadeena ayaa u aragta in kharashka daryeelka caafimaadku aad u badan yahay. Baaritaanka guud waa u bilaash caruurta iyo kuwa	Families checking in at clinic desk.

## Emergency, Community, Health and Outreach

Scene	Audio	Video (do not translate)
	hanaqaadka ah ee haysta kaarka caafimaadka Medical Assistance iyo MinnesotaCare.	
5	Dhakhaatiirta iyo kalkaalisooyinka ayaa la socon kara sannad walba oo hubin kara in caruurta si caafimaad qab ah u barbaarayso. Caruurta yaryar ayaa iyagu u baahan ballamo badan oo ay ku tagaan kilinikada, waayo caruurta yaryar si degdeg ah ayay u kortaa, si degdeg ahna way isu baddelaan. Caruurta yaryar waxay u baahanyihiin tallaal, dhakhaatiirtana waxay ku dadaali karaan in jidhkooda iyo maskaxdooda ay nolol caafimaad qab ah ku bilaabanto.	Infants and toddlers.
6	Dhakhaatiirtu waxay u baahanyihiin inay baaraan aragtida, maqalka, dhererka iyo miisaanka caruurta iskuulada dhigata. Baaritaanka ayay dhakhaatiirtu ku hubiyaan in caruurta cunto cunno caafimaadka u fiican, dhaq-dhaqaaqa jismigana ay sameeyaan. Inta ay caruurta sii weynaanayaanba, dhakhaatiirtu waxay kala hadlaan isbaddelka jidhkooda ku imanaya.	Doctor with 10-year old.
7	Caruurta hanaqaadka ah inta jidhkooda iyo maskaxdoodaba ay u sii dhowaanayso da'da dadka waaweyn, ayaa waxay u sii baahdaan daryeel khaas ah. Afkaarta iyo dareenka caruurta hanaqaadka ah ayaa u ekaada inuu marna kacsanyahay, marna hooseeyo. Waxaa laga yaabaa inay dareemaan murugo, farxad, cadho, ama jaha-wareer. Dareenka noocaas ah waa mid caadi ah. Balse, haddii ay u dhaqmaan siyaabo xadka ka baxsan, waxaa laga yaabaa inay u baahan yihiin gargaar caafimaad. Waalidiinta iyo barbaarta walwalkan oo kale qaba ayaa caawimaad ka heli kara dhakhaatiirta.	Teens playing basketball. Teen with provider.
8	Barnaamijka baaritaanka guud ee caruurta iyo barbaarta ayaa sidoo kale kaa caawin kara daryeelka ilkaha. Caruurta ayaa baran karta sida loo daryeelo ilkahooda iyo cirridkooda si ay u barbaaraan iyagoo afkoodu caafimaad qabo.	Family at clinic.
9	Ilmahaaga oo aad u geyso dhakhtarka iyagoo xitaa caafimaad qaba ayaa ka caawisa in ilmahaagu xoogaysto, caafimaadna ku barbaaro. Dhakhaatiirta ayaa raba inay idin bartaan adiga iyo caruurtaada marka ay korayaan.	Host on camera.
10	Shaqaalaha baaritaanka guud ee caruurta iyo barbaarta ayaa kaa caawin kara helidda kiliinig, sameynta ballamaha, gaadiid iyo ilaha wax-qabadka	URL.

# ECHO *Script*



## *Emergency, Community, Health and Outreach*

Scene	Audio	Video (do not translate)
	kuu leh. Wixii su'aal ah, wac Child and Teen Checkups (Baaritaanka guud ee caruurta iyo barbaarta). Waxay kugu la hadlayaan luqadaada ama waxay adeegsanayaan turjumaan.	